Minnesota Department of Education

QAYBTA C OGAYSIISKA HABRAACA BADBAADADA

DHEXGALKA HORE EE DHALLAANKA IYO SOCOD-BARADKA

Ujeeddada dokumiintigaan ayaa ah in la helo macluumaad guud ee xuquuqda waxbarashada qaaska ku saabsan ee sharciga gobolka iyo federaAalka ku jira ee la siinayo waalidka dhalay caruur u dhaxeeya dhalashada illa 2 jir. Waxuu sharraxayaa xulashada xuquuqda qaarkood ee waalidka lagu siinayo sharciyada hoosimaanaya Xeerka Shakhsiyaadka Nafonimada Waxbarashada qaba iyo sharciyada Minnesota (Individuals with Disability Education Act - IDEA) iyo sharciyada Minnesota; haseahaatee, maaha sharraxaad dhammaystiran ee xuquuqdaas. Dokumiintigaan ma galayo booska talada sharciyeed, mana aha wax galaya booska latashiga qareen shati u haysta xaaladdaada sharciga uu quseeyo.

HORDHAC

Qoraalkaan gaaban waxa uu bixinayaa warbixin kooban ee xuquuqda uu waalidka waxbarashada qaaska u leeyahay ee dhallanka iyo socod-baradka ka qusaysa adeegyada soo dhexgalka hore, mararka qaarkood habraaca badbaadada (procedural safeguards) loo yaqaanno. Ogaysiiskaan Habraaca Badbaadada waa shardi in lagu siiyo marka canuuggaga uu ku jiro waxa hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA, oo ay ku jirto marka adiga ama degmadu codsato nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista. Degmadu waxaa kaloo laga rabaa in ay nuqulka xogta canuggaaga ee dhexgalka hore ee sanadlaha soo gudbiso, ayadoo wax lacag aysan kaaga baxayn.

QORAALKA OGAYSIISKA MUDNAANSHAHA

Dugsiga degmada ama bixiyaha adeegaya waxaa shardi ku ah in uu ku siiyo qoraalka ogaysiiska mudnaashaha muddo caqligal ah gudaheeda ee ka horraysa markasta ee la bilaabayo ama wax laga baddalayo, aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarashada canuggaaga ama helitaanka adeegyada dhexgalka ee dhallankaaga ama socod-baradkaaga ee canuggaaga iyo canuggaaga qoyskiisa la siinayo. Ogaysiiskaan waa in lagu siiyo kahor inta wax isbaddal ah aan lagu samayn iyo ay ku jiraan tafaasiil ku filan ee laguugu sheegayo waxa ku saabsan:

1. Waxqabadka la soo jeediyaya ama la diiday;
2. Sharraxaad ku saabsan sababta ay degmadu u soo jeedinayso ama ay u diidayso inay waxqabato; iyo
3. Hababka badbaadada oo idil ee laga helayo waxa hoosimanaya Qaybta C ee IDEA, sharraxaadda dhexdhexaadinta ay ku jirto, sida dacwadda gobolka laga xaraysanayo, iyo shuruudaha ku jira nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista, iyo waqtiga jadwal kasta oo nidaamyadaas hoosimaanaya.

Ogaysiiskaan waa in lagu qoro luqad ay dadka intiisa badan fahmi karaan iyo afkaaga hooyo lagugu siiyo waa haddii aysan jirin wax arrinkaas ka hormimaanaya.

Haddii afkaaga hooyo ama siyaabo kale ee wax lagula soo xariiro uusan af qoran ahayn, hay'adda guud, ama daryeelaha adeegyada dhexgalka hore bixinaya, waa in uu qaado tallaaboyin la hubinayo in ogasiiska hadal ku turjuman ama qaabab kale ee wax layskugu sheego lagugu siiyo. Daryeelahu sidoo kale waa inuu qaado tallaaboyin lagu xaqiinayo in aad ogaysiiska fahamtay; iyo uu jiro qoraal lagu caddaynayo in shuruudahaan la qanciyay.

Afka hooyo, marka loo isticmaalo qof ay fahmadiisa af ingriisiga yartahay, macnaheeda waxay tahay in luqadda uu qofka caadi ahaan ugu hadlo, ama marka wuxu ay ilmo yihiin, luqadda ay tahay midda waalidka ay canugga kula hadlaan. Waxa la xariira cabbiraadda iyo qiimaynta canugga lagu sameeyay, afka hooyo waxaa laga wadaa luqadda u si caadi ah canugga ugu hadlo, haddii waxa ka hormarinaya canugga luqaddiisa ay qubarada qiimaynta ama cabbiraadda ay noqotay waxa ay isku raaceen. Haddii wuxu ay canug dhegala' ama dhega culus ay ku taxluuqaan, ama yahay qof aanu lahayn afka hooyo ee qoran, afka hooyo waxaa laga wadaa habka luqadda uu qofka caadi ahaan dadka kula xariirayo, sida luqadda baaqyada, braille, ama hadal la iskula xariiro.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAADA

Haddii aad doonayso in lagugu caawiyo fahamka mid kasta xuquuqdaada habraaca ah ama wax kasta ee canuggaaga waxbarashadiisa la xariira, fadlan isuduwaha waxbarashada hore ee canuggaaga ama qofka hoos ku qoran la soo xariir. Ogaysiiska waa in afkaaga hooyo lagugu siiyo ama qaab kale ee la iskula xariro oo ay dhici karo in aad isticmaalayso.

Haddii aad wax su'aala ah qabto ama maclumaad dheeraada aad doonayso, fadlan la soo xariir:

Magaca: _____

Jagada: _____(tus: Isuduwaha dhexgalka hore ama maamulaha waxbarshada qaaska)

Telefoonka: _____

Wixii macluumaad dheeraada, waxa aad kala xariiri kartaa mid ka mida hay'adahaan:

ARC Minnesota (u doodda dadka naafonimada koritaanka qaba)
www.thearcofminnesota.org
651-523-0823; 1-800-582-5256

Minnesota Association for Children's Mental Health
(Iskaashatada Minnesota ee Caafimadka Dhimirka Caruurta)
www.macmh.org
651-644-7333; 1-800-528-4511

Minnesota Disability Law Center
(Xarunta Sharciga Naafonimada Minnesota)
www.mndlc.org
612-332-1441; 1-800-292-4150
612-332-4668 (TTY)

PACER (Isbahaysiga U Doodidda Waalidka ee Xuquuqda Waxbarashada)
www.pacer.org
952-838-9000; 1-800-53-PACER
952-838-0190 (TTY)

Minnesota Department of Education
(Waaxda Waxbarashada Minnesota)
www.education.state.mn.us
651-582-8689
651-582-8201 (TTY)

OGGOLAASHAHA WAALIDKA

Qeexitaanka Oggolaashaha

Waalid ahaan, waxa aad xaq u leedahay oggolaasho in aad ka bixiso tallaabo kasta oo ay degmadu soo jeediso. Oggolaashaha macnaheeda waxay tahay in aad si buuxda aad wax uga warhayso, afkaaga hooyo lagugu siiyay, dhammaan macluumaadka oo idil ee macnaha leh ee marka hawlaha lagu fulinayo lagaa haysto oggolaashahaaga oo qoraal ah iyo in aad si buuxda u fahamsantahay iyo raalli ka tahay si qoraal ah in hawlaha oggolaashahaaga lagaa codsaday lagu fulinayo. Oggolaashaha qoraalka waxuu sharraxayaa hawlaha iyo taxanaha xog kasta ee soo dhexgalka hore ah ee la siidaynayo iyo cidda loo siidaynayo. Oggolaashuhu waa iqtiyaari waana laga noqon karaa waqti kasta. Haseyeeshe haddii aad oggolaashahaaga la noqoto, in la noqotashadaasi aysan ku jirin hawlo horay loo soo qabtay.

Marka Degmada Lagu Xiro Inay Oggolaashahaaga Haysato

Waxaa jira xaalado badan oo degmadu ku qasbantahay in oggolaashahaaga qoraal ah ay haysato kahor inta aysan hawlagalin. Degmadu waxaa shardi ku ah in ay haysato oggolaashahaaga qoraal ah kahor intay waxa soo socda ayna dhicin:

1. Samayso baaritaanno loo isticmaalayo si lagu ogaado haddii laga shakisanyahay in canuggaaga uu nafoonimo qabo;

2. Saymayso dhammaan cabbiraadda iyo qiimaynta Qaybta C oo idil ee canuggaaga;

3. Bixiso adeegyada dhexgalka bilowga ee canuggaaga ku aaddan;

4. Isticmaasho waxtarka guud ama caymiska gaarka si lagu bixiyo kharasha adeegyada dhexgalka ee Qaybta C marka ay xaaladaha qaarkood jiraan; iyo

5. Siidaynayso macluumad si toosa lagu ogaan karo xaaladda uu canuggaaga ku suganyahay.

Waalid ahaan, waxaad kaloo xaq u leedahay in aad ogaysiiska qoraalka hesho iyo oggolaasho qoraal ah bixiso si ay hay'adaha u wadaagaan macluumaad sharciga gobolka iyo fedeeraalka dhawraya.

Waalidka Xaqiisa ee Oggolaashaha uu ku Diidayo

Haddii aadan oggolaasho bixin, degmadu waa in ay ku dadaasho in ay kaa dhaadhadhico si ay ku hubiso muhiimadda ay qiimayntu leedahay, ama jiritaanka in la helo adeegyada dhexgalka hore, iyo aad fahamto in canuggaaga aanu cabbiraadda iyo qiimaynta helayn ama adeegyada dhexgalka hore helayn haddii aadan oggolaashaaha bixin. Degmadu ma isticmaalayso nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista loo marayo si ay uga hortagto diidmaadaada ku aaddaan Qayta B ama C ee IDEA si ay ku hesho oggolaasho kasta oo ay u baahantahay. Sidaa uwgeed haddii aad qoraal ku diiddo ogoolaashaha dhexgalka hore ee qiimaynata ama dib u qiimaynta canuggaaga degmadu kama hormimaanyaso diidmadaada.

Xuquuqda Waaliidka inay Adeegyada Diidaan

Waxa aad go'aan ku gaari kartaa in aad oggolaato ama aad diiddo adeegyada dhexgalka hore. Waxa aad go'aan ku gaari kartaa in aad ku kala dooran karto ama ku diidi karto noc kasta ee adeegyada dhexgalka hore, ay ku jiraan diidmada adeegyada kaddib marka aad horay ugu oggolaatay, adigoon wax halis galinayn adeegyada dhexgalka hore ee kale ee canuuggaga la siin karo.

Macluumaadka Asturan iyo Xogta Gaarka ee la Aqoonsan Karo

Macluumaadka gaarka ee la aqoonsan karo wa macluumaad ay ku jiraan, balse aanu ku koobnayn, canugga magaciisa; magacaaga (waalidka magaciisa) ama xubno kale; cinwaankaaga; canuggaaga cinwaankiisa; wax aqoonsi gaar ah, sida lambarka Sooshal Sekuuradka canuggaaga; xogta sifooyin qofka gaar u ah; wax aqoonsi ah ee dadban ee kale, sida canugga taariikhdiisa dhalashada, meesha uu ku dhashay, hooyada magaceedi inta aan la guursan, ama taxanaha sifooyin shaqsiyeed; ama macluumaad kale ee suurtagal ka dhigaya in canuuggaga si dhaba lagu aqoonsanayo.

Degmadu, Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE), iyo bixiyeyaasha adeeg kasta ee dhexgalka hore waa in uu dhawro asturnaanta maclumaad kasta ee xogta adiga ama kan canugga lagu aqoonsan karo, ay ku jiraan macluumaadka iyo xogta ay aruurinayaan, isticmaalayaan, siidaynayaan iyo burburinayaan. Guudahaan, degmada ama hay'ad kale oo hawlaha ku guda jirta ma ay siidayn karto macluumaad gaara ee la aqonnsan karo, sida ay Qaybta C ee IDEA ugu qeexantahay, cid kasta ee kale marka laga reebo hay'ado kasta ee hawlaha ku guda jira (ay ku jirto hay'adda horseedka ah iyo bixiyasha adeegyada dhexgalka) oo ka mid ah gobolka nidaamkeeda Qaybta C ayadoon oggolaashaha waalidka laga haysan waa haddii ay fasaxdo inay sidaasi samayso waxa hoosimaanaya IDEA ama ujeeddo kasta aan ahayn in sida lagu qancinayo shuruudda sharcigaas. Fadlan tixraac Xuquuqda Waxbarashada Federaalka iyo Sharciga Asturnaanta (FERPA) si lagu helo macluumaad dheeraada ee shuruudaha oggolaanshaha ku saabsan xogta asturnaanta ee sharciga federaalka.

Axdiyada asturnaanta Qaybta C ee IDEA ku jira waxaa lagu dabbaqayaa waqtiga marka canuggaaga la faro adeegyada dhexgalka hore illaa marka degmadu aysan shardi ku ahayn in ay hayso ama ay gacanta ku hayn macluumaadka canuggaaga marka la eego sharciyada lagu dabbaqayo, hadba kii dambeeya.

Ogaysiis Waalidka ku Socda ee Asturnaanta ku Saabsan

Degmadu waa inay ku siiso ogaysiiska marka canuggaaga la faro in uu hoosimaanayo Qaybta C ee IDEA oo si buuxa kula socodsiinaysa shuruudaha asturnaanta ku saabsan ee kor ku xusan. Ogaysiiskaan waa inay ku jiraan tilmaan-bixin canuggaaga ee waxa maclumaadka gaarka ee qofka lagu aqoonsan karo ku saabsan laga hayo, noocyada macluumaadka ee canuggaaga uu codsaday, qaababka loogu talagalay in lagu isticmaalo, ay ku jiraan ilaha laga helay macluumaadka la aruuriyay, iyo sida macluumaadka canuggaaga ku saabsan loo istimcaamali doono. Ogaysiiskaan waa in ay ku jiraan shuruudaha iyo nidamyada oo la soo koobay oo degmadu iyo hay'adaha wax bixiya laga rabo in ay raacaan waxa la xariira keydinta xogta adiga iyo canuggaaga ku saabsan, siidaynta xogtaan ee dhinacyada saddexaad la siinayo, haynta iyo burburinta macluumaadka lagu aqoonsan karo shaqsiga. Waxaa sii raaca, ogaysiiskaan waa in ay ku jiraan xuquuqda mowduucyada asturnaanta ee Qaybta C hoosimaanaya. Ugu dambayntii, ogaysiiskaan waa in ay ku jiraan tilmaan-bixin illaa inta uu yahay heerka ogaysiiska lagu bixinayo luqadaha u gaarka kooxaha dadka kala duwan ee gobolkadeggan.

QORSHEYAASHA ADEEGGA QOYSKA U GAARKA AH (IFSP)

Haddii canuggaaga uu saddex sano ka yaryahay iyo uu naafonimo qabo, adiga iyo canuggaaga waxa aad xaq u leedihiin in aad IFSP qaadataan. IFSP waa qorshe qoran oo ay soo diyaariyeen koox xogogaalinaysa himilaadaada ku aaddan qoyskaaga iyo canuggaaga. IFSP waxaa kalo ku jira adeegyada sida ugu wanaagsan adiga iyo canuggaaga ku caawinaya in aad gaartaan himilooyinkaas iyo laga warbixiyo marka, meesha, iyo sida adeegyadaas lagu bixin doono. Adiga iyo xubnaha qoyskaaga waxa aad la shaqaynaysaan isudwaha adeegga dhexgalka hore iyo bixiyaasha kale (haddii ay ku habboontahay) si IFSP lagu dhiso. Waxa aad ku martiqaadi kartaa cid kasta in ay kulamad IFSP tiimaddo, ay u doodayasha ku jiraan. IFSP waxaa dib-u-eegis lagu sameeynayaa ugu yaraan lixdii biloodba, ama joogta ahaan ka badan haddii la codsado. Adiga waxa aad ku jirtaa qoorshaynta waqtiga, taariikhda iyo goobta ay kulamadaan ka dhacayaan si ka qaybqaadashadaada lagu hubiyo. Waxa aad codsan kartaa kulan aad canuggaaga IFSPgiisa dib ugu eegayso waqtiga aad doonto, xitaa haddii mid dhowanahaan u dhacay. Degmadu waa in ay ku siiso nuqulka qiimayn kasta, cabbirid kasta, qiimaynta qoyska, iy IFSP sida ugu dhaqso badan kaddib kulanka IFSP kasta ayadoon kharash kuugu kacayn.

XUQUUQDA ADEEGAYDA JAWI CAADI AH LAGU HELAYO

Adeegyada soo dhexgalka hore ee dhallanka iyo socod-baradka ee naafonimada qaba waxay xoogsaarayaan qoyskaaaga iyo waxa canuggaaga hawlmaalmeed ahaan uu sameeyo iyo waxaa loogu talagalay in hawlaha lagu qabto waqti cayiman. Adeegyada waxaa lagu bixinayaa, ilaa heerka ugu sarreeya ee ku habboon, jawiga dabiiciga ah. Tan waxay adiga iyo/ama canuggaaga daryeelihiisa kale ku caawinaysaa in aad ku barataan xeeladaha canuggaaga lagu barayo xirfado cusub ee maalinka oo idil lagu soo celcelinayo. Marka ay baahida adeegga jirto waa in lagu bixiyo meelkasta ee aan ahayn jawi dabiici ah, kooxda IFSP waa in ay marmaarsiiyada qoran ku bixiyaan IFSPga.

OGAYSIISKA SANADLAHA EE QORAALKA AH EE LA XARIIRA QAANSHEEGTA DHINACA SADDEXAAD EE ADEEGYADA CAAFIMAADKA LA XARIIRA (QORSHAHA QOYSKA GAARKA U AH)

Dusiga degmadu waa in uu haysto oggolaashahaaga kahor inta waxtarkaaga (ama waxtarka canuggaaga) ama macluumaadka caymiska lagu isitcmaalayo in adeegyada Qaybta C lagu bixiyo, haddii oggolaashada loo baahdo.

Degmadu waa inaybixiso ogaysiiska qoraalka ah sanadlaha ee dhahaya:

1. Oggolaashaha waalidka waa in laga haysto waxa hosimaanaya Qaybta C ee IDEA kahor inta hay'adda hormuudka ah ama Bixiyaha Adeeyada Dhexgalka Hore uu siidaynayo xogta shakhsiyeed sababo fulinta qaansheegtada la xariira;

2. Bayaan mowduucyada shuruudaha aan ahayn kharashka kabaya ee Qaybta C ee IDEA. Haddii aadan oggolaasho bixin, Qaybta C waa in ay adiga iyo canuggaga diyaar u tahay ayado IFSP loo soo marayo taaso aad adiga horay oggolaasho ka bixisay;

3. Degamada waxay u qaanshaganaysa gargaarka caafimaadka ama Minnesota Care adeegyada caafimaadka la xariira ee canuugaaga IFSP ugu ku jirta;

4. Waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo nuqulka xogta waxbarashada ay degmadu ay cid saddexaad la wadaagayso marka ay doonayso lacag celinta adeegayada caafimadka canuuggaaga la siinayo ee IFSPga ku jira; iyo

5. Waxaad xaq u leedahay in aad kala baxdo oggolaashahaaga siidaynta xogta waxbarashada canuggaaga ay cid saddeesaad la yeelatay waqti kasta. Haddii aad oggolaashada la noqoto, degmadu lama ay sii wadaagayso xogta waxbarashada canuggaaga si ay qaansheegto ugu dirto cidda saddexaad sababo la xaariira adeegyada caafimaadka la xariira ee IFSPga ku jira. Waqti kasta ayaad la noqon kartaa oggolaashadaada, iyo adeegyada canuggaaga lagu siinayo IFSP lama baddalayo ama lama joojinayo.

XOGTA WAXBARASHADA

Helitaankaaga Xogta

Waxaad xaq u leedahay in aad sal iyo baar dib u eegto Qaybta C oo idil ee xogta dhexgalka hore ee canuggaaga ku saabsan iyo qoyska canuggaaga laga soo aruuriyay, laga hayo ama laga isticmaalay ee hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA, ay ku jraan xog la xariirta qiimaynta iyo cabbiridda, baaritaanka, go'aamada u qalmidda, dhisidda iyo hirgalinta ee IFSP, mowduucyada adeegyada dhexgalka hore, cabashooyinka gaarka ah ee canugggaaga ku saabsan, ama qayb kasta ee xogta dhexgalka hore ee canuggaaga. Codsashada kaddib, degmada waa in ay ku siiso helitaanka xogta dhexgalka hore ee canuggaaga ayadoon aysan dhicin wax dib u dhaca aan loo baahnayn iyo kahor in uusan dhicin kulan kasta ee la xariira IFSP ama dhegaysi maxkamadeed. Degmadu waa in ay codsigaaga uga jawaabto sida ugu dhaqsiyo badan, haddii ay surtogal tahay, ama muddo 10 cisho gudahood ee codsiga la sameeyay (laga reebayo toddobaad dhammaadyada ama ciidaha sharciga ah).

Xaqaaga ah in aad baarto iyo dib u eegto xogta dhexgalka hore waxaa ku jira ee xaqa loo leeyahay:

1. Jawaab laga helayo degmada marka codsi caqligal ah laga sameeyo sharraxaadda iyo fasiraadda xogta canuggaaga;

2. Codsashada ah in degmada ka qaybqaadanaysa ay adiga ku siiso nuqullada xogta dhexgalka hore ee canuggaaga haddii lagu guuldarraysto in nuqulladaan lagu siiyo waxay si cad uga hortaygaysaa istimaalka aad xaq ugu leedahay in aad eegto iyo dib u eegto xogta;

3. In aad weydisato wakiilkaaga in uu baaro iyo dib u eego xogta dhexgalka hore; iyo

4. Aad dib u eegto xogta canuggaaga inta jeer ee aad rabto, ayadoo sharciga gobolka la raacayo. Sharciga gobolka waxuu leeyahay mar haddii lagu tusay xog asturan iyo lagu sheegay macnaha ay ku fadhido, xogtaasi uma baahna in laguu siidayo muddo gaaraysa lix bilood waa haddii uusan jirin qilaaf ama tallaabo la qaadayo ama macluumaad cusub la sameeyaya ama la soo aruuriyay.

Degmadu waxay u qaadanaysaa in aad awood u leedahay in aad baarto iyo dib u eegto xogta la xariirta canuggaaga waa haddii aysan jirin dukumiintiyo degmada loo gudbiyay oo sheegaya in aadan fasax u lahayn marka sharciyada goboleed la duldhigo oo ku shaqa leh arrimaha ay ka mid yihiin haynta, korinta guri kale, ilaalinta, kala-noolaansha, iyo furriinka.

Marka sharciga Minnesota la eego, xogta waxbarshada waxaa ka mida macluumaadka badankiis ee canuggaaga la xariira ee dugsiga lagu hayo, ay ku jiraan qiimaynta iyo cabbiridda, go'aamada u qalmidda, dhisidda iyo hirgalinta IFSP dhowr ah, dacwadda shakhsiyeed ee canuggaaga la xariirta, iyo ama xog kasta ee kale ku saabsan canuggaaga iyo qoyskaaga. Laakiin, macluumaadka canuuggaaga ee barahu uu sida gaarka u ka hayo waxbarashadiisa ama waxbarashadeeda ee gaarka uu isticmaalayo laguma darayo darayo xogta waxbarashada.

Siidaynta La Siinayo Shirkadda Qorshaha Caafimaadka

Degmadu uma ay siidaynayso macluumaad ku jira IFSP ee canuggaaga, oo ay ku jiraan macluumaadka cudurka iyo daawaynta, shirkadda qorshaha caafimaad ayadoon saxiixa oggoolaanshahaaga la haysan.

Xogta Hal Canug Dhaafsan

Haddii xog kasta waxbarashada ee hal canug dhaafsan, adiga waxa aad xaq u leedahai in aad baartid iyo dib u eegi kartid oo kaliya macuulaamd canuggaaga la xariira. Waxaa aad oggolaasho aad ku baarayso iyo dib ugu eegayso ka donaan kartaa xogta waxbarashada ee macluumaad caruur kale ku saabsan marka kaaga lagu daro, laakiin waalidka caruurtaasi waxa ay xaq u leeyihiin in ay diidaan codsigaaga oggolaashaha la xariira.

Helitaanka Xogta ee Dad Kale

Degmadu waa in ay kaydiso xogta codsi kasta lagu raadinayo iyo cidda raadinaysa xogta dhexgalka hore ee la soo aruuriyay, la hayo, ama lagu isticmaalo waxa hoosiimaanaya Qaybta C ee adiga iyo canuggaaga ku saabsan. Helitaanka xogtaan ee aad adiga iyo wakiillada loo fasaxay iyo shaqaalaha degmada uma baahna in la xog-ogagaaliyo. Helitaanka xogtaan waa in ay ku jiraan magaca shakhsiga loo oggolaaday helitaanka, iyo in ujeeddada shakhsiga loogu oggolaaday in uu isticmaalo xogta dhexgalka hore.

Taxanaha Noocyada iyo Rugaha Macluumaadka

Kaddiib marka aad ka codsato, degmada iyo MDE waa in ay ku siiyaan taxanaha noocyada iyo rugaha xogta waxbarashada ay soo aruuriyeen, hayaan ama isticmaalaan.

Oggolaashaha Xogta Lagu Siidaynayo

Guud ahaan, ogglaashahaaga ayaa loo baanahanyahay kahor inta aan macluumaad gaara ee la aqoonsanayo loo siidayn shakhsiyaadka ama hay'adaha aan fasax u haysan. Oggolaashahu waa in uu yahay mid qoraal ah iyo si qaasa u sheegaya shakhsiyaadka ama hay'daha loo fasaxay in ay macluumaadka helaan; mowduuca macluumaadka la siidaynayo; ujeddada laga leeyahay in lagu isticmaalo; iyo waqti cayiman ee cagligal ah ee macluumaadka la siidaynayo uu ku egyahay. Marka la codsado, degmadu waa in ku siiso nuqulka xogta ay siidaysay.

Ujrada wax lagu Raadinayo, Dib Lagula Soo Baxayo iyo Nuqul-samaynta Xogta

Degmadu ujro kuma ay soo dallacayso raadinta dib ula soo bixidda xogata. Laakiin, haddii aad nuqullo codsato, degmadu waxaa dhici karta in ay ujro yar kugu soo dallacdo isticmaalka nuqullada, waa haddii aysan tan kahorimaanayn xaqa aad u leedahay in aad baarto iyo dib u eegto xogta waxbarashada sababto ah awood uma lihid in aad iska bixiso. Degmadu waa in ay ku siiso nuqulka mid kasta ee canuggaaga qiimayntiisa, qiimaynta qoyska, iyo IFSP sida ugu dhaqsaha badan kabacdi kulan ee IFSP ayadoon wax ujra ah aysan kugu kacayn.

Sixidda Xogta ee Waalidka Codsashadiisa

Haddii aad rumaysantahay in macluumaadka xogta dhexgalka hore ee canuugaaga aysan sax ahayn, qaladna ku jiro, dhammaystirnayn, ama jabinaysa canuggaaga waxa gaarka u ah ama xaqa waalid ahaanta, waxa aad codsan kartaa in degmadu ay saxdo ama ka saarto macluumaadka.

Degmadu waa in ay go'aan ku gaarto muddo cagligala haddii ay saxayso xogtga. Haddii degmadu ay go'aan ku gaariwaydo saxitaanka xogta, waa in ay kuu sheegto diidmadeeda sababta aysan u saxayn iyo ay kuu sheegto xaqa aad u leedahay dhegaysi maxkamadeed si looga hortago degmada go'aankeeda.

Fursadda Dhegaysiga

Marka aad codsato, degmadu waa in ay ku siiso fursadda dhegaysiga maxkamadeed ee aad uga hortagayso macluumaadka ee canuggaaga xogtiisa dhexgalka hore si lagu hubiyo inaysan sax ahayn, qaladna ku jiro, ama gebihaanba jabinayso xogta gaarka ah ama xaq kale ee adiga ama canuggaaga. Waxa aad codsan kartaa sida nidaamka hoosimaanaya Qaybtga C ee IDEA ama aad codsan kartaa dhegaysi maxkamadeed sida uu qorayo nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista Minnesota.

Haddii natiijada dhegaysiga kaddib ay degmadu go'aan ku gaarto in macluumaadka uusan sax ahayn, qalad yahay ama jabinaya asturnaanta ama xaq kale ee adiga iyo canuggaaga, waa in ay saxdo macluumadka sida laga rabay iyo ay qoraal kugula socodsiiso.

Haddii, natiijada dhegaysiga awgeed, degmada ay go'aan ku gaarto in macluumaadka canuggaaga xogtiisa dhegxgalka hore aanay ahayn sax, qaladan ku jiro, ama gebihaamba ay jabinayso sharciga

asturnaanta ama xaq kale ee adiga ama canuggaaga, waa in ay kula socodsiiso in aad xaq u leedahay in aad ku darto ereyo qoran ee afkaartaada iyo diimadaada oo ay la socoto maclumaadka aad ka hortimid ee xogta canuggaaga dhexgalka waxbarashadiisa hore. Sharraxaad kasta ee la soo raaciyay canuggaaga xogtiisa dhexgalka hore ee waxbarashada waa in degmada u hayso isagoo qayb ahaan ka mida canuggaaga xogtiisa dhexgalka hore inta ay canuggaaga xogtiisa degmada lagu haynayo. Haddii canuggaaga xogtiisa dhexgalka hore ama qaybta canuggaaga xogtiisa ee laysku haysto ay degmada ama cid kale siidayso, sharraxaadda aad soo gudbisay waa in dhinaca kale loo gudbiyo.

Wareejinta Xogta

Sharciyada Minnesota waxay shardi ka dhigayaan in degmada, dugsiga jaartarka, ama u wareegidda dugsi aan dugsi guud ahayn ee ardaygga xogtiisa waxbarasnada, ay ku jiraan xogta aqlaaqda, ee dugsi uu ardayga ka soo wareegayo una wareegayo dugsi uu ardayga isku qorayo muddo 10 cisho ee maalmaha la shaqeeyo ee codsiga uu dhacay.

Burburinta Xogta

Degmadu waa in ay kuu sheegto marka macluumaad shakhsiahaaneed ee la aqoonsan karo la aruuriyay, la hayo, ama ay degmadu isticmaashay aan loo bahnaayn si lagu bixiyo adeegyada dhexgalka hore ee canuuggaaga la siinayo. Xaq waxaad u leedahay in aad codsato in xogta waxbarashada ee ku saaban shuruudda adeegyada dhexgalka ee canuggaga lagu siinayo waxa hoosimanaya Qaybta C ee IDEA in la burburiyo marka aad sidaas ku codsato. Macluumaadkaan waa in ay degmada burburiso kaddib marka ay codsigaaga hesho. Laakiin, degmadu waxay reeban kartaa xogta joogtada ah ee canugaaga magaciisa, taariikhda dhalashada, macluumaadka waalidka lala xariirayo (ay ku jiraan cinwaanka iyo lambarka telefoonka) magacyada isuduwaayasha iyo bixiyeyaasha adeegyada dhexgalka hore, iyo taariikhda ka baxidda (ay ku jiraan sanadka iyo da'da ka baxidda, iyo barnaamijyo kasta ee canuuggaaga uu qaatay kaddib marka uu Qaybta C ka baxay).

Marka sharciga federaalka la raaco, burburinta waxaa laga wadaa burburinta xogta waxa maaddiga ah ama ka saaridda macluumaadka ee wax shaqsiga tilmaamaya si lagu hubiyo in macluumaadka aysan ku jirin wax gaar ahaan lagu aqoonsan karo. Sidaa-darteed, canuggaaga xogtiisa uma baahna in si maaddi ahaan loo burburiyo si lagu addeeco codsigaaga burburinta xogta waxbarashada gaarka wax la xariira. Degmooyinka waxa ay si ku habboon u adeeci karaan shuruuddaanoo burburiya waxa la xariira macluumaadka shaqisiahaaneed ee la aqoonsan karo ee waxbarashda gaarka canuggaaga. Doorashada qaabka burburinta waxa ay guud ahaan ku xirantahay degmada.

Inkastoo aad codsatay in xogta la burburiyo, degmadu waxa ay hayn kartaa xogta qaarkeed ee looga baahanyahay in lagu addeeco Sharciga Shuruudaha Waxbarashada Guud (GEPA), taaso u bahaan in qaatayaashah dhaqaalaha federaalka laga hayo xogta la xariirta istimcaalka dhaqaalaha. Waxa rabi kartaa in aad haysato xogta waxbarashada qaaska ee canuggaaga ku saabsan ujeeddo caddayn mustaqbalka ah la xariirta, sida dalbashada waxtarka Dakhliga Cayrta Dheeraarka (Supplemental Security Income) (SSI).

Degmadu ma ay burburinayso xog kasta ee waxbarashada haddii weli u maqanyahay codsi lagu baarayo ama dib loogu eegayo xogta.

CANUGGA XAQIISA KU AADDAN WAALIDKA WAXBARASHADA

Canugga naafonimada qaba ee waalidkiisa aan la sheegin cidda ay yihiin ama ah kuwo aan meelna lagu ogayn, degmadu ayadoo dadaal fiican muujinaysa, ama ah ilmo ay dawladdu hayso, waxa uu xaq u leeyahay in ay dawladdu u qabato waalidka waxbarshada.

Hay'adda ku habboon waa inay go'aansato haddii canugga uu u baahanyahay waaliddka waxbarashada iyo inay waalidka waxbarashada u magacawdo. Marka waalidka waxbarashada ay u magacabayso canugga, hay'adda guud waa inay la xaajooto hay'adda loo xilsaaray daryeelka canugga. Hay'adda guud waa in dadaal fiican ku muujiso si lagu hubiyo in waalidka waxbarashad lagu qabtomuddo aan ka badnayn 30 cisho kaddib marka degmadu ay go'aansatay in canugga uu u bahaanyahay waalidka waxbarashada.

Waalidka waxbarashada waxaa lagu dooran karaa qaab kasta oo sharciga dawladduu uu dhigayo. Hay'adda guud ee ku habboon waa inay hubiso in qofka loo magaacabay in uu waalidka waxbarashada noqdo uusan ahayn shaqaale hay'ad ama bixiyaha adegyada dhexgalka hore ee daryeel bixiyaha ama canugga daryeela ama xubin kasta ee qoyska ee canugga; aan wax dan shakhsiyeed ama mid jagodoon oo faragalinaya danaha canugga uu metalayo ama ay metalayso; haysta xirfadaha iyo aqoonta looga baahanyahay in uu si fiican ugu metalayo canugga. Marka ay meesha ku jirto in canugga uu yahay mid ay dawladdu hayso, waalidka waxbarashada waxaa magacabi kara garsoore canuggaa kiiskiisa haya, waa marka la isla ogyahay in waalildka waxbarashada uu yahay mid ka soo bixi kara sifooyinka kor ku xusan. Qofka qancinaya in u noqdo waallidka waxbarashada ma noqon karo shaqaalaha hay'adda guud sababtoo ah in asaga ama ayada uu yahay/ay tahay mushaar ka qaadato hay'adda ugu adeegaysa waalidka waxbarashada.

Waalidka waxbarashada waxa uu leeyahay xaquuq la mida midka uu leeyahay waalidka dhabta ah ujeeddooyinka idil ee hoosimaanaya shuruudaha Qaybta C. Sida awgeed waalidka waxbarashada waxa uu meteli karaa canug arriamaha dhan oo quseeya qiimaynta iyo cabbiridda canugga, koritaanta, iyo hirgalinta canugga IFSP uu leeyahay, ay ku jiraan qiimaynta sanadlaha iyo dib u eegyada xilliyeedka, helitaanka u socda ee adeegyada dhexgalka hore, iyo xaq kasta ee canugga uu helayo ee hoosimaanaya shuruudaha Qaybta C.

KHILAAFAADYADA SI DUWAN LAGU XALLINAYO

Dhinacyada waxaa lagu dhiirrigalinayaa inay ku xalliyaan qilaafyada la xariira aqoonsashada, qiimaynta, meelaynta waxbarashada, go'aanka bayaanka, meelaynta kumeelgaarka ee waxbarashada, ama mowduucyada la xariira waxbarashada guud ee lacag-la'aan ah ee canuuggaaga lagu siinayo dhexdhexaadin, wadaxaajood, oo ka socda kulamada kooxda IFSP, ama lagu marinayo nidaamyo kale ee duwan. Dhammaan fursadahaha qilaafyada sida duwan lagu xallinayo oo idil waa kuwo qiyaar ah looma cuskan karo in dib loogu dhigo xaqa aad u leedahay in sharciga loo maro. Nidaamka xallinta qilaafka idil ee duwan waxaa lagugu siinayaa lacag-la'aan.

DHEXDHEXAADIN

Dhexdhexaadintu waa lacag-la'aan, nidaam qiyaar ah ee lagu caawinayo in khilaafaadka lagu xalliyo. Dawladda ayaa kharashka dhexdhexaadinta ku baxaya bixinaysa. Adiga ama degmadaada waxa aad ka

codsan kartaan dhexdhexaadin MDE ee laga wacayo 651-582-8222 ama 1-866-466-7367. Dhexdhexaadinta waxaa qabanaya xeeldheere iyo dhexdhexaadiye aan dhanna raacsanayn (dhinac saddexaad) ee tababar u qaatay farsamada dhexdhexaadin tayo leh. Gobolkuwaxa uuhayaa taxanaha shakhsiyaad oo ah dhexdhexaadiyeyaal tayo leh iyo aqoon u leh sharciyada iyo xeerarka la xariira helitaanka waxbarashada qaaska iyo adeegyada la xariira. Dhexdhexaadiyeyaasha waxaa magacaabaya Gobolka si ku salaysan qaab kaltan ahaan ah iyo degaan ahaan ah.

Dhexdhexaadintu looma isticmaali karo in lagu diido ama dib loogu dhigo xaqa aad u leedahay in sharciga la maro ama xuquuq kale ee hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA. Labadiinaba, adiga iyo shaqaalaha degmada waa in aad oggolaataan iskudyga dhexdhexaadinta uu idiin qabanayo dhexdhaxiiye la magacaabay. Waqti kasta inta dhexdhexaadinta lagu jiro, adiga ama degmada waxa soo afjari karaan dhexdhexaadinta. Kulan waliba ee nidaamka dhexdhexaadinta waa in uu ku dhacaa waqti cayiman iyo lagu qabto rug ay adiga iyo degmadu isku raacdeen. Adiga iyo degmadu waa inaad buuxiisaan nidaamka dhexdhexaadinta muddo 30 cisho gudahood ee laga bilaabayo taariikhda ay MDE codsi qoraala ee dhexdhexaadin ah, ay labada dhinacba saxiixeen.

Hadddii adiga iyo degmada aad heshiis ka gaarteen qilaafka iyo ay hawsha dhexdhexaadinta socotay, heshiiska laga gaaray waa in la qoro. Heshiiska waa in aad wada saxiixdaan adiga (waalidka) iyo wakiilka degmada ee awood u haysta in ay degmadu addeecdo. Dhinacyada la dhexdhexaadiyay waxaa loo gudbinayaa nuqulka heshiiska. Wadahadallada dhacaya inta ay hawsha dhexdhexaadintu socoto waa kuwo asturan iyo inaan daliil loo qabsanayn haddii nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista ah ama mid madani ah lagu kala baxayo.

Xallinta qilaaf dhexdhexaadin lagu dhammaynayo, ama qaab kale ee duwan xawsha lagu xallinayo, kuma koobna oo keliya qilaafaadka rasmimigay ee ka imaanaya diidmadaada iyo kuma koobna waqti xiga codsiga hawsha dhegaysi dacwadda loo marayo. Waqti kasta ee aad doonto ayaad dhexdhexaadin ku codsan kartaa si qilaafka lagu xalliyo wax hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA, ay ku jiraan arrimo ka dhalan kara wax ka horreeyay xaraynta dacwadda nidaamka xuquuq dhawrista, ayadoon aan la eegayn haddii dacwadda waxbarashada qaaska la xareeyay ama codsi nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista la sameeyay.

Hay'adda deegaanka waxa ay codsan kartaa dhexdhexaadin ayada oo metelaysa hay'daha u qaabilsan marka qilaaf uu ka dhexdhasho hay'adaha marka masuuliyadda ay noqoto in la isku xiro, la bixiyo, la qaansheegto, ama la fudududeeyo qaansheegashada ku baxa dhallaanka ama socd-baradka qaadanaya adeegyada dhexgalka hore. Adiga ama degmada waxa aad codsan kartaan dhexdhexaadin kale ee qilaafka lagu xallinayo inta uu ka hirgalayo heshiiska la dhexdhexaadiyay.

Shakhsiga ku shaqeynaya dhexdhexaadiye ahaan ma uu noqon karo shaqaale Gobolka, degmada, ama bixiyaha ku hawlan bixinta adeegyada dhexgalka hore ama adeegyada kale canuggaaga waxa ku siman Qaybta C ee IDEA. Dhexdhexaadiyuhu ma uu yeelan dano gaar ama kuwo xirfadeed ee qilaafaysa dhexdhexaadnimada. Dhexdhexaadiyaha looma haysto in uu yahay shaqaale gobolka, degmada, ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore sababto ah asaga ama ayada hay'addu ay ugu mushaariso in uu dhexdhexaadiye noqdo.

Wixii macluumaad dheeraada ee dhexdhexaadinta ku saabsan, fadlan kala soo xariir isuduwaha dhexdhexaadinta ee MDE ee laga helayo 651-582-8222.

XARAYNTA DACWADDA QORAALKA AH

Adiga ama degmada waxa aad dacwad ka xaraysan kartaan MDE. Dacwooyinka MDE loo dirayo waa inay:

1. Ahaadaan kuwo uu uqoray iyo uu saxixay shakhsiga ama hay'adda dacwadda xaraynaysa;
2. Ku jiraan afkaar ah eedayn in la jabiyay sharciga waxbarashada qaaska ee gobolka ama federaalka ama xeer la xariira Qaybta C ee IDEA;
3. Ku qoranyihiin waxa dhacay oo ah waxa eedaynta ay ku salaysantahay;
4. Ku jiraan saxiixa iyo macluumaadka lagala soo xariirayo dacwoodaha;
5. Ku jiraan magaca iyo cinwaanka canugga, magaca bixiyaha adeegyada dhexgalka hore, warbixinta waxa ay yihiin cudurka canugga uu qabo, ay ku jiraan dhacdooyinka dhibaatada la xariira, iyo waxa la soo jeediyay ee dhibaatada lagu xallinayo illaa inta laga ogyahay iyo laga hayo waqtiga cabashada la xaraynayay, haddii xadgudubka la isku eedeeyay uu si qaasa canuggaaga uu la xariiro; iyo
6. Eedda qaladka dhacay wax aan **hal sano** kahor ka badnayn taariikhda dacwadda la qaabilay.

Dacwadda waa in loo diro:

Minnesota Department of Education
Division of Compliance and Monitoring
Due Process Supervisor
1500 West Highway 36
Roseville, MN 55113-4266
Phone: 651.582.8689
Fax: 651.582.8725

Dhinaca dacwadda xaraynaysa, adiga ama degmadada, waa in aadu dirtaan degmada nuqulka dacwadda ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore isla waqtiga aad adiga ama degmada aad ka xaraynaysaan MDE.

MDE waxay dhammaystiri doontaa baaritaankeeda iyo soo gudbinaysa go'aan qoraal muddo 60 cisho gudahood ee waqtiga caadiga, waa haddii aysan ka reebanayn xaalad aan caadi ahayn ee u baahnaan karto waqti inta ka badan ama haddii adiga iyo degmada aad ku heshiisaan in aad waqtiga kororsataan si aad waqti dhexdhexaadin ugu heshaan. Adiga (waalidka) ama dugsiga degmada uu go'aanka xukunka ku dhacay waxa ay racfaan ka xaraysan kartaan go'aanka dacwadda ee ugu dambeeyay muddo 60 cisho gudahood kaddib marka la helo go'aanka kama dambaysta ah.

Haddii dacwad qoraal ah la helo ay tahay arrin nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista ah ay ku socoto, ama ay ku jiraan dhowr arrimood oo mid ama dhowr ay ka mid yihiin dhegaysigaa, qaybta dacwadda ee lagu guda jiro ee nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista ah waa in dhinac la isla dhigo illaa dhegaysga uu ka dhammaanayo.

Haddii arrinka laysla soo qaaday ee lagu xareeyay waxa hoosimaanay Qaybta C ee IDEA oo hadda kahor go'aan lagaga gaaray dacwad dhacday oo isla dhinacyada is-haysata ka dhaxaysa, go'aanka

dacwadda waa lagu qasbanyahay dacwoodaha waa in ay MDE la socodsiiso arrinkaan. Fadlan qaybta hoosee eeg si aad macluumaad dheeraada ee nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista loo marayo ku hesho.

FOOMANKA LA DIYAARIYAY

MDE waxay diyaarisay fooman loo seemayay oo loogu talagalay in dacwooyika waxbarashada qaaska ama dacwad qabsashada loo marayo. Foomankaan qasab maaha in la isticmaalao, laakiin waa diyaar si isticmaalka looga fiiriyo marka dacwadda la xaraynayo. Foomankan la diyaariyay waxaa laga helayaa MDE shabakaddeeda oo laga galayo: www.education.state.mn.us > Dooro School Support > Special Education Programs > Compliance and Monitoring > Due Process Forms.

DHEGAYSIGA XUQUUQ DHAWRISTA AAN EEXDA LAHAYN

Nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista caruurta ee hoosiimanaya Qaybta C ee IDEA, Minnesota waxa ay dooratay in ay isticmaasho Qaybta B ee dhegyasiga xuquuq dhawrista lagu qoray IDEA.

Codsashada Dhegaysiga Xuquuq Dhawrista

Adiga, degmada, ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore waxa aad ka xaraysan kartaan adeegyada dhegaysiga xuquuq dhawrista MDE waxkasta ee la xariira aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta canuggaaga, ama shuruudda adeegyada dhexgalka hore ee canuggaaga iyo qoyskaaga la siinayo ee hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA. Qaasataan, dhegaysiga xuquuq dhawrista waxa lagu codsan karaa wax la xariira soojeedin ama diidmo lagu bilaabayo ama lagu baddalyo canuggaaga qiimayntiisa, IFSP, meelaynta waxbarashada, ama FAPE lagu bixinayo. Codsashada nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista waa in uu qoraal ahaado iyo waa in uu ay jirto eedayn sharci-jebin ee IDEA oo dhacay wax aan ka badnayn **laba sano** ee ka horraysay taariikhda marka adiga ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore aad ogaateen, ama loo baahnas in aad ka warhaysaan, waxa ku saabsan taallabada lagu eedaynayo oo salka u noqonaysa dacwadda xuquuq dhawrista.

Waqtiga labada sano shaqo kuma laha haddii lagaa horjoogsan in aad xaraysato dacwaddanidaamka xuquuq dhawristahis sababta oo ah in degmadu ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore si qaldan uu ku fasiray in wixii la xalliyay dhibaatadii salka u ahayd dacwadda nidaamka xuquuq dhawrista ama degmada ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore uu ku fashilmay in uu ku siiyo wax la socda macluumaadka lagaga baahanyahay waxa hoosimaanaya IDEA.

Haddii aad codsatay ama haddii adiga ama degmada xarayseen dacwadda nidaamka xuquuq dhawrista, MDE waa in ay kula socodsiiso wixii sharciga ee lacag-la'aan ah ama jaban iyo wixii kale adeegyada ah ee loo baahanyahay ee meesha aad deggantahay laga helo.

Sarkaalka dhegaysiga dhexdhexaadka ah ayaa kiiskaaga loo xilsaarayaa. MDE waxay haynaysaa taxanaha shakhsiyaadka qabanaya shaqada saraakiisha dhexdhexaadka ah. Inta dhegaysiga xuquuq dhawrista ah uu socdo kuma soo hadalqaadi kartid arrimo hor leh oo aan ku jirin dacwadda qoraalka ah.

Muddo 15 cisho gudahood kaddib marka ay dacwadda nidaamka xuquuq dhawrista aad hesho, iyo wixii ka horreeyay dhegaysiga xuquuq dhawrista, dugsiga degmada waa in u ka shaqeeyo sidii xal loo heli

lahaa oo la kulmaan adiga iyo xubanaha muhiimka ah ee canugga Kooxdiisa IFSP ee xogogaalka u ah arrimaha lagu eedanaynayo dacwada nidaamka xuquuq dhawrista. Haddii kulanka xallinta aan lagu qaban muddo 15 cisho gudahood kaddib marka la helay dacwadda nidaamka xaquuq dhawrsita, waxa aad codsanaysaa in uu sarkaalka dhegaysiga soo faragaliyo kaaso bilaabaya nidaamka xaquuq dhawrista waqtiga laga gaarsiinayo.

Kulanka xallinta waa in ay ku jiraan wakiilka degmada oo haysta awoodda ah in uu go'aan gaaro iyo UUSAN ku jiri karin qareen degmada ka socda waa haddii aadan adiga qareen kula socon. Adiga iyo degmada ayaa ku heshiinaya xubnaha muhiimka ee kooxda IFSP ee ka qaybqaadanaya kulanka Xallinta. Ujeddada kulankaan waxa uu yahay in aad ka wada hadashaan dacwadda xuquuq dhawrista, si markaasi dugsiga degmada uu fursad lagu xalliyo ugu helo in uu qilaafka salka u ah dacwadda xuquuq dhawrista.

Kulanka Xallinta looma baahna in uu dhaco haddii adiga iyo degmada aad qoraal ku heshiisaan in aad iska dhaaftaan kulanka ama aad dhexdhexaadin ku heshiisaan. Haddii aadan ka qaybqaadan kulanka xallinta taallabooyinkaaga waxa ay dib u dhigi doonaan waqtiga loo qabtay nidaamka xallinta iyo dhegaysiga xuquuq dhawrista illaa kulanka la qabto.

Muddada Xallinta

Haddii aad xalka lagu dhammayn muddo 30 cisho gudahood ee ku siman marka la qabtay cabashaadaada xuquuq dhawrista, muddada dhegaysiga ayaa bilaabmaysa iyo dhegaysiga xuquuq dhawrista waa uu dhici kara. Haddii degmadu heli weydo ka qaybqaadashadaada kulanka xallinta ama dhexdhexaadin kaddib marka dadaallo macquul la sameeyay, iyo in degmadu ay caddaysay dadaalka ay u gashay ka qaybgalkaaga, iyo haddii degmadu aysan heshiis ku ahayn in ay ka weecato qabashada kulanka xallinta ama isticmaalka dhexdhexaadinta, markaa waxaa dhici karta in degmadu, kaddib ay dhammatay muddada 30ka cisho, in ay sarkaalka dhegaysiga ka codsato in uu joojiyo dacwaddaada xuquuq dhawrista.

Muddada Dhegaysiga

Muddada dhegaysiga ee 30ka cisho ah waxay bilaabmaysaa maalinka xiga marka kuwa soo socdo mid uu qabsoomo:

1. Adiga iyo degmada waxa aad qoraal ku heshiinaysaan kulanka xallinta;
2. Kaddib marka ay dhexdhexaadin maa kulaanka xallinta midkood ay bilaabmaan, laakiin muddo ka horraysa dhammaadka muddada 30ka cisho, adiga iyo degmada labadiinaba waxa aad qoraal ku heshiinaysaan in heshiis uusan suurtogal ahayn; ama
3. Adiga iyo degmadu ku heshiisaan in la sii wado dhex-dhexaadinta dhammaadka 30 cisho ee muddada xallinta, laakiin, kadib, adiga ama degmada aad ka bixi kartaan hawlaha dhex-dhexaadinta.

Gaarista Heshiiska

Haddii adiga iyo degmada aad kulanka xallinta heshiis ku gaartaan, adiga iyo degmada waa in aad hirgalisaan heshiis sharci ahaan lagu qasbanyahay oo ay labadiinaba adiga iyo walkiil degmada ka

socda ee awoodda leh ku qasbaya in ay degmada ayiddo aad wada saxiixdeen; heshiiska waa mid lagu qasbanyahay in laga fuliyo maxkamadda gobol kasta ama degmo kasta. Adiga iyo degmadu waa diidi kartaan ansixinta fulinta heshiiskan saddex cisho gudahood.

Xaqa Lagu Waynayo Dhegaysiga Xuquuq Dhawrista

XUSUUSO: Sababo la xariira fasiraadda sharciga gobolka ee Maxkmadda Racfaanka ee Sideedaad, haddii canuggaaga uu baddasho dugsiga degmooyinka iyo haddii aadan adiga ku codsan dhegaysiga xuquuq dhawrista kahor inta uusan canuggaaga isku qorin dugsiga cusub ee degmada, waxaa dhici karta in aad ku wayso xaqa dhegaysiga xuquuq dhawrista ee ku saabsan arrimaha waxbarashasda qaaska ee degmadii hore ka soo ifbaxay. Waxaad weli xaq u leedahay in aad codsato nidaamka xuquuq dhawrista ee arrimaha waxbarashada qaaska ku saabsan ee ka dhaca degmada cusub ee canugggaaga uu ku qoranyahay.

Nidaamyada lagu Bilbaabayo Dhegaysiga Xuquuq Dhawrista

Haddii aad rabto in uu dhegaysi lagu siiyo, adiga ama qareenkaaga waa in aad si rasmi ah qoraal ku codsataan nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista. Codsiyada qoraalka ee nidaamka xuquuq dhawrista waa in ay ku jiraan:

1. Magaca iyo cinwaanka canuggaagaa;
2. Magaca bixiyaha adeegyada dhexgalka hore ee canuggaaga u shaqeeya;
3. Tilmaan-bixinta dhibaatada jirta, ay ku jiraan aragtida arrimaha; iyo
4. Go’aanka laga soo jeediyay dhibaatada illaa inta laga ogyahay iyo waqtigaa la hayo ee codsigaaga nidaamka dhegaysiga xuquuq dhawrista.

Kaddib marka adiga ama degmada aad ka heshaan codsiga qoraalka ee dhegasyga, MDE waxay ku qasbantahay in ay ku siiso nuqulka nidaamka ogaysiiska habraaca badbaadada, oo ay ku jiraan tilmaan-bixinta xuquuudaada ee dhegaysiga nidaamka xuuq dhawrista. Haddii adiga ama degmada aad dhegaysi codsataan, dhinaca kale waa in uu soo gudbiyo nuqulka codsashada iyo nuqulka codsiga u gudbiya MDE.

Haddii aad xarayso codsiga dhegaysiga iyo aadan horay degmada uga u helin ogaysiiska qoraalka mudnaanshaha ee ku saabsan arrinka laysku haysto ee dhegaysiga lagu codsaday, degmadu waa in ay kuu soo dirto qoraal ay ku sharraxayso sababta ay degmadu u soo jeedisay ama ku diidday in ay tallaabo ka qaaddo codsiga laysku soo qaaday dhegaysiga muddo 10 cisho kaddib marka ay codsiga dhegaysiga hesho. Sharraxaaddan waa in ay ku jiraan tilmaan-bixinta fursado kale oo kooxda IFSP ay eegtay; sababta fursadahaasi lagu diidday; tilmaan-bixinta nidaamka qiimayn kasta; cabbiraadda, xogta, ama ka warbixinta ay degmada ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore uu salahaan ugu isticmaalay ka tallaabaqaadista ama diidmada; iyo tilmaan-bixinta xaaladaha muhiimka u ah degmada go’aamadeeda soojeedinta ama diidmada.

Kaddib marka ay hesho codsigaaaga dhegaysiga, degmada waa in ay kuu soo dirto qoraal jawaaba si qaasa uga hadlaya arrimaha aad ku soo hadalqaadday codsiga dhegaysiga muddo 10 cisho gudahood ee marka codsiga la helay.

Degmada ama bixiyaha adeegyada dhexgalka hore waxa ay tiigsan karaan in codsigaaga dhegaysiga qancinayn shuruudaha sharciga gobolka. Codsashada dhegaysiga waxaa loo qaadanayaa mid ku filan waa haddii dhinaca codsiga loo dirayo aanu u sheegin sarkaalka dhegaysiga iyo dhinaca kale muddo 15 cisho kaddib marka codsiga la helo iyadoo ay rumansanyihiin in codsigu qanciinayn shuruudaha u degsan. Sarkaalka dhegaysiga waa in uu muddo shan cisho ah kaddib marka uu helo codsiga iyo sida ugu dhaqsiyo badan uu dhinacyada qoral ku ogaysiiyo go'aankaas.

MDE waxay haysaa taxanaha sarkiisha dhegaysiga ee khibrad leh. Kaddib marka ay hesho codsi qoraal ah ee dhegaysiga, MDE waxa ay magacaabaysaa sarkaalka dhegaysiga oo ku jira taxanahaa si uu dhegaysiga uu qabto. Hoos waxaa ku yaalla qaar ka mida xuquuqdaada dhegaysiga. Kan ma aha taxanaha xuquuqyda oo idil.

Labadiinaba adiga iyo degmada waxa aad xaq u leedihiin:

1. In uu idin la socdo iyo talo idin siinayo qareen iyo shakhsiyaad aqoon gaar u leh ama tababar gaar u haysta adeegyada dhexgalka hore ee dhallaanka iyo socod-baradka naafonimada qaba;
2. Caddaymo iyo kahortagid, maragfurid, iyo kasbataan iska xaadirinta markhaatiyad;
3. La mamnuuco ku darista caddayn kasta ee dhegaysiga la horkeenayo oo aan horay shaaca laga qaadin ugu yaraan shan cisho ee maalmalaha la shaqeeyo ee dhegaysiga ka horreeyay, ay ku jiraan qiimaynta xogta iyo talooyihnka ku salaysan xogtaas ee loogu talagalay in dhegaysiga la soo galiyo; iyo
4. La helo ereyo qoraal ah ama eletroonig ah, xog hikaadsan ee qoraalka guursan iyo/ama helitaanka caddaymaha iyo go'aamada.

Waalid ahaan, waxa aad xaq u leedahay in aad:

1. Go'aansato haddii ama haddii aadan canuggaaga uu dhegaysiga nidaamka xuquuq dhawrista yimaado. Dhallaanka iyo socod-baradka uma baahna in ay dhegaysiga nidaamka xuquuq dhawrista yimaadaan, laakiin, adiga oo ah waalidka, waxaad go'aansan kartaa haddii ama haddii uusan dhallaankaaga ama socod-baarakaaga uu dhegaysiga nidaamka xuqud dhawrista uu imaan karo;
2. Dhegaysiga dadwaynaha u furan; iyo
3. Lagu siiyo nuqulka xogta iyo qoraalka-guursan ee dhegaysiga iyo xogta uu sarkaalka dhegaysiga soo uruuriyay, gabagabooyinka iyo go'aamada sharciga lagu sameeyay lacag-la'aan.

Sixidda Codsiga Dhegaysiga Nidaamka Xuquuq Dhawrista

Adiga iyo degmada waxa aad sixi kartaan cogsigaaga dhegaysiga nidaamka xuquuq dhawrista oo keliya haddii dhinaca kale u qoraal ku oggolaado sixitaanka iyo la siiyay fursad lagu xalliyo cabashada nidaamka xuquuq dhawrista lagu dhammeeyo kulan wadaxajood ama haddii sarkaalka dhegaysiga uu fasax ku bixiyo. Sarkaalka dhegaysiga waxa uu fasixi karaa oo keliya wax aan ka dambayn shan cisho kahor inta aan la qaban nidaamka xuquuq dhawrista.

Haddii adiga ama degmada aad xaraysaan codsi lagu saxay nidaamka xuquuq dhawrista, muddada kulanka xalgaarista iyo muddada xalgaarista waxay bilaabmayaan marka la xareeyo codsiga la saxay.

Siidaynta Caddayn Dheeraada ee ka horreeya Dhegaysiga iyo Kulamada Dhegaysiga ka Horreeya

Dhegaysiga kulanka ka horreeya waa in lagu qabto muddo shan cisho ee la shaqeeyo gudahood ee taariikhda uu maamulaha uu magacaabo sarkaalka dhagaysiga. Sarkaalka dhegaysiga waa in uu bilaabo dhegaysiga kulanka ka horreeya. Kulankaan waxaa lagu qaban karaa qofahaan ahaan, ama telefoon. Sarkaalka dhegaysiga waa in uu aruuriyo xogta hadallada laysku sheegayo ee kulanka la hormariyay, kuwaaso la siinayo adiga iyo degmada marka la codsado kaddib. Kulanka la hormariyay, sarkaalka dhegaysiga waa in uu arrimahaan ka salgaaro: aqoonsado su'aalaha u baahan in laga jawaabo si qilaafka lagu xalliyo iyo laga saaro cabashooyin aan salka lahayn; dhiso jadwal u nadaamsan dhegaysiga iyo hawlaha kulamada dheeraadka ee la dhagaysiga hortiis; go'aansado iyo dhegaysiga aan looba baahnayn in uu dhaco ayaddon la marag-fur dhicin iyo, haddii taasi dhacdo; la dajiyo maamul, hoggaan, iyo goobta dhegaysiga uu si caddaalad, hufan, iyo dajin waxqab leh lagu dhammeeyo.

Ugu yaraan shan cisho ee maalmaha la shaqeeyo kahor inta uusan dhegaysiga dhicin, adiga iyo degmada waa in aad cid waliba cidda kale u sheegto qiimaynnada canuggaaga oo idil ee la dhammeeyay taariikhdaas iyo talaabooyinka ku salaysan qiimaynnadaas ee loogu talagalay in dhegaysiga loo isticmaalo. Sarkaalka dhegaysiga waxa uu diidi karaa in aad soo bandhigto qiimayn aan shaaca laga qaadin ama soo jeedin dhegaysiga ka dhaca ayadoo oggolaasho dhinaca kale laga haysan.

Go'aanka Dhegaysiga

Sarkaalka dhegaysiga waa in uu go'aan kama dambaysa ah ka gaaro nidaamka xuquuq dhawrista iyo uu siiyo nuqulka go'aanka dhinac waliba muddo aan dhaafsanayn 45 cisho ee ka dambaysa muddada 30ka ama muddo waqtiga xilliyada la saxay. Sarkaalka dhegaysiga waxaa lagu dhirriigalinayaa in uu dadajiyo wakhtiga 30ka cisho ee canugga saddex sano ka yar oo baahidiisa ay muddo gaaban si dhaqsa isu baddalayaan iyo u bahaan go'aan degdegsan ee qilaafka ku saabsan. Go'aanka dhegaysiga waqti ayaa lagu sii dari karaa marka sarkaalka uu ogaado in ay sabab macquula jirto. Sarkaalka dhegaysiga waa in uu dhegaysiyada hadalka ku qabto waqti iyo meel ku habboon adiga iyo canuggaaga. Sarkaalka dhegaysiga go'aankiisa haddii dhallaanka ama socod-baradka si habboon lagu xaqiijiyay, qiimeeyay, ama lagu meeleeyay, ama haddii dhallaanka ama socod-baradka nafoonimada qaba iyo qoyska lagu siiyay adeegyada dhexgalka hore ee ku habboonaa ee hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA, waa in ay ku salaysnaadaan wax la taaban karo. Go'aanka dhegaysiga waa kama dambays waa haddii adiga iyo degmada aad xaraysaan dacwad madani ah. Sarkaalka dhegaysiga awood uma laha in uu saxo go'aanka waa haddii aysan ahayn qaladaad xagga hikaadda ama lambarrada ee karaaniga uu sameeyay.

Codsiyo Kala Duwan ee Nidaamka Xuquuq Dhawrista

Waxa aad xaq u leedahay in xaraysato dacwo duwan ee nidaamka xuquuq dhawrista ee arrin duwan midka aad ka xaraysatay nidaamka xuquuq dhawrista ee hadda socda.

DIIWAANKA DACWADAHA IYO DHEGAYSIYADA

Go'aamada kama dambaysta ee dhegaysiyada dacwooyinka waxbarashada qaaska iyo nidaamka xuquud dhawrista waxay dadwaynaha kala socon karaan shabakadda MDE. MDE waxay haysaa diiwaanka dadwaynaha ee la yiraahdo Dacwooyinka, Dhegaysiyada iyo Farsamada Warqadaha Lagu Raadiyo (Complaints, Hearings and Letters Search Engine). Go'aamada waxay ku jiraan diiwaanka waxaan laga saaray macluumaadka qofka lagu aqonsanayo. Diwaankaan waxaa laga helayaa shabakadda internetka ee U Hoggaansanaanta iyo Adeecidda ee MDE laga galayo: www.education.state.mn.us/MDE/SchSup/SpecEdComp/ComplMonitor/index.html.

DACWADDA MADANIGA

Marka adiga iyo degmada aad isku qilaaftaan waxa la caddeeyay ama go'aanka uu sarkaalka gaaray, labadiina midkiinba waxa aad dacwad madani ka xareysan kartan maxkamad iyo rafaacan ka qaadan kartaan. Dacwadda waxaa la horgayn karaa maxkamad degmada federaal ah ama maxkamadda racfaanka gobolka. Heerar kalal duwan ayay maxkamad kasta wax dib ugu eegaysaa. Rafcaaka maxkamadda gobolka waa in lagu sameeyo muddo 60 cisho ee maalmaha kalendarka kaddib marka aad heso rasiidka go'aanka. Racfaanka maxkamadda degmada federaalka waa in lagu sameeyo muddo 90 cisho ee taarikhda aad hesho rasiiskka go'aanka. Haddii aad rafcaan xaraysato, waxaa la samayn doona baariitanno iyo go'aamo dhexdhexaad ah ee dib u eegid lagu gaarayo go'aanka racfaanka laga qaatay.

MEELAYNTA INTA UU DHEGAYSIGA AMA DACWAD MADANI AH SOCOTO

Muddda dhegaysiga ama tallaabo maxkamadda lagu guda jiro, haddii aydan adiga iyo degmada siyaabooyin kale ugu heshiinin, canuggaaga waa in la sii siiyo adeegyada dhexgalka hore ee ku habboon kuna qaato meesha la isla ogyahay iyo ay IFSP ku jira. Haddii dacwadduc ay qusayso arjiga adeegyada bilawga ah ee hoosimaanaya Qaybta C ee IDEA, canuggaaga waa in la sii siiyo adeegyadaa aan qilaafka ka jirin.

DHEGAYSIYADA NIDAAMKA XUQUUQ DHAWRISTA LA DEDEJIYAY

Adiga ama degmada waxa aad xaraysan kartaan codsi qoraala ee dhegaysiga nidaamka xuquud dhawrista la dedejiyay.

Dhegaysiyada la dedejiyay waa in lagu qabto muddo 20 cisho gudahood ee taarikhda dhegasyiga la xareeyay. Sarkaalka dhegaysiga waa in uu gaaro go'aan muddo 10 cisho gudahood ee dhegaysiga kaddib ah. Kulanka go'aanka waa in uu ku dhaco muddo toddoba cisho kaddib marka dhegaysiga la qabtay, waa haddii adiga iyo degmada aydan ku heshiin si qoraal ah in laga kaaftoomo kulanka go'aanka ama isticmaalka nidaamka dhexdhexaadinta. Dhegaysiga nidaamka xuquuq dhawrista la dedejiyay waa ay sii soconaysaa waa haddii aan xaaladdu sida la rabay aan wax looga qaban labada dhinacba muddo 15 cisho marka codsiga la helo.